SOMALI

Infosheet 2. Interview

# KU OGOW XUQUUQDAADA

## WAREYSIGA MAGANGALY ADA DHEXDIISA

LEGAL CENTRE LESVOS

**Waraaqdaan macluumaadka waxa ay ku jiro macluumaad guud oo ku saabsan xuquuqdaada inta lagu jiro waraysiga magangalyada iyadoo loo fuliyay si waafaqsan hannaanka xuduudaha ee Lesvos, Greece.**

**Waxay ku saleysan tahay qodobada Sharciga Giriiga oo saxda ah laga soo bilaabo Luulyo 2024.**

**Xaashida macluumaadka ma aha mid dhammaystiran oo waxaa laga yaabaa in ay i isbadel dhacaan.**

**Waxaan kugula talinaynaa inaad la tashato qareen  ruqsadeysan si aad ugu dhaqanto sharciga Giriiga ama NGO-ga oo bixinaayo taageerada sharciga ee ku saabsan kiiskaaga gaarka ah dhacdo kasta dhexdeeda.**

- Waraysiga magangalyada waa waqti xadidan oo codsigaaga magangalyada lagu baari doono. Ujeedada waraysigani waa inay masuuliyiintu fahmaan inaad xaq u leedahay magangalyada caalamiga ah iyo inaad gaarto go'aan la xiriira codsigaaga.
- Xaqiiji inaad u diyaargarowday oo aad diyaar u tahay inaad la tashato qareen ama NGO-ga bixinaayo taageerada sharciga ka hor taariikhda waraysigaaga.
- Wareysiga lagula yeelanaayo waa mid qarsoodi {sir ah} warbixintaada lama wadaagaayo wadankaga asalka aad ka soo jeedo

**MARKA LA JOOGO BILOWGA WARAYSIGAAGA MAGANGALYADA**

## **Xaqiiji inaad si cad oo buuxda u fahantay** wax kasta oo ay ku sheegaan

- Haddii aadan fahmin turjubaanka (tusaale ahaan, haddii ay ku hadlayaan lahjad kale ama sida fasiraada loo sameeyay ayaa ku wareerineyso), **waxaad codsan kartaa in lagaa badalo turjubaanka.** Waa muhiim inaad taas samayso sida ugu dhakhsiyaha badan ee suurtogalka ah inta lagu guda jiro bilaawga waraysiga.

- Hadii aadan ku aadan ku qanacsanayn turjumaanka, **waxaad codsan kartaa turjubaan kale** haddii aad sabab fiican u keento taas.

- Haddii aad tahay qof dumar , **waxaad weydiisan kartaa - oo aadna xaq u leedahay inaad hesho - turjubaan dhedig ah iyo warayste dhedig ah.** Xasuusnow in haddii codsigaaga la aqbalo laakiin turjumaan kale oo isla markiiba la heli karo uusan jirin, tan waxaa loola jeedaa waa in waraysigaaga dib loo dhigo waqti kale oo mustaqbalka dhow ah.

**Xaqiiji xogtaada gaarka ah**, oo ay ku jiraan magacaaga saxda ah, taariikhda dhalashadaada, da'daada, waddankaaga asalka ah, sida kuwa aad sheegtay waqtigii diiwaangelintaada.

- **Haddii ay wax khaldan yihiin, codso inaad badel ku sameyso.** Tani waxay u baahan kartaa inaad ku bixiso dukumeentiyada dheeraadka ah qaabkoodii **asalka** ahaa (shahaadada dhalashada, kaarka madaniga , ama wax u dhigma).

- **Haddii aad tahay qof yar** oo si qalad ah laguugu diiwaangeliyay sidii qof weyn, waa inaad sheegtaa oo aad bixisaa caddeyn kasta oo ay ku qoran tahay da'daada dhabta ah iyo/ama weydiiso ay ku gudbiyaan qolyaha ku shaqada leh qiimeynta da'da.

- **Hadii aan tan la tixgalin inta lagu guda jiro waraysigaaga**, waa inaad weydiisataa qareen inuu kaa caawiyo helitaanka hanaanka qiimeynta da'da.

- **Adeegga magangalyada dadka ka shaqeeya ayaa ku weydiin doona inaad siiso ciwaanka iimaylka**. Haddii ay dhacdo in aad siisid, hubi in uu iimaylkani shaqaynayo, inaad geli karto oo aad hubin karto maalin kasta. Haddii kale waxaad halis ugu jirtaa inaadan arkin go'aankaaga ama macluumaadka kale ee ka socda xafiiska magangalyada iyo inaad seegto waqtiyada kama dambaysta ah ee go'aankaaga ama kiiskaaga.

**Keen  dhammaan dukumiintiyada iyo caddeymaha taageeraya kiiskaaga,** tusaale ahaan

- Dukumiintiyada caafimaadka ama qiimeyn ku saabsan xaaladaada caafimaad (jirka ah ama maskax ah) ay soo saareen hay'adaha NGO yada, isbitaalka, dhakhaatiirta khaaska ah, ka socda wadankaaga asalka ah, iwm;
- Dukumeentiyo, sawiro, muuqaalo, maqaal kasta ama cadaymo kale oo cadeenaya taageeraya waxa aad dooneyso inaad sheeegto;
- Maqaal kasta oo ka mid ah warbaahinta, warbixinta ama xusuusta oo ku saabsan dhibaatooyinka gaarka ah ee aad kala kulantay waddankaagi asalka aha ama sababaha aadan dib ugu laaban karin.

# INTA LAGU GUDA JIRO WARAYSIGAAGA MAGANGALYADA

- Waxaad xaq u leedahay in aad codsato **nasasho iyo biyo** wakhti kasta inta lagu guda jiro waraysigaaga haddii aadan caafimaad qabin oo aad u baahan tahay in aad xoogaa nasato, hawo qaadato, ama aad cabaar sosocoto.

- Ka jawaab su'aalaha lagu weydiiyo **adiga oo bixinaaya macluumaad badan iyo faahfaahino badan intii suurtagal ahaad awood** : MAXAA DHACAY, GOORMEE AYAY DHACDAY, XAGEE AYAY KA DHACDAY, SIDEE AYAY U DHACDAY, YAA GOOBJOOG AHAA?

- **Ha u hadlin si guud** oo isku day inaad **si gaar ah u sheegto sida suurtagalkasan** wax ku saabsan waxa adiga ama qoyskaaga iyo qaraabadaada idinku dhacay.

- **Haddii aadan xasuusan** jawaabta su'aasha, ama aadan hubin  isku day **inaad is dejiso**, oo aad u sharaxdo in aadan xasuusanin iyo SABABTA aadan u xasuusanin una sheeg qofka ku wareesanaya

- **Haddii aadan garanayn jawaabta ama aadan hubin** jawaabta su'aal gaar ah, u sheeg in aadan garanayn ama in aadan hubin. Haddii ay jirto sabab aadan u garaneyn jawaabta ama aadan u hubin jawaabta  .sidoo kale waa inaad u sheegtaa sababta.

- **Haddii aadan fahmin** su'aal gaar ah ama macnaha eray ama oraah gaar ah waxaad u baahan tahay inaad iyada sheegto, si uu waraystaha si kale kuugu fahansiyo su'aashan gaarka ah adiga.

- **Haddii aay dhacdo in aad is  buriso**, oo qofka ku waraysanayana uu ku waydiinayo wax ku sabab u noqon kara in aad is buriso., fadlan  isdeji oo ka faa'iidayso fursada  si aad ugu sharaxdo sababta aad adiga isku burisay.

- Xaqiiji inaad haysato fursad aad kaga **hadasho wax ku saabsan dhammaan arrimaha aad dooneyso inaad sheegto.** Haddii aad dareento in su'aalaha qaarkood aan lagu weydiin, ku adkeyso inaad ka hadasho. Dhammaadka waraysiga, waraystaha waxaa uu ku waydiin doonaa, "*miyey jiraan wax aad jeclaan lahayd inaad ku darsato*?" Waa inaad ka faa'iideysataa fursadan si aad ugu sharaxdo wax kasta oo aadan ilaa hadda ka hadlin ama wax kasta oo aad dooneyso inaad xooga saarto.

- Waxaa laga yaabaa wareesataha in uusan wax badan ka ogayn xaalada ka jirta wadankaaga asalka ah. Haddii ay jiraan arrimo aad kuugu muuqda si cad (tusaale ahaan, dagaalo joogto ah, cadaadis lagu hayo kooxo laga tiro badan yahay oo gaar ah, dilal toogasho ah, adeegsiga rabshado, xasillooni daro siyaasadeed, ku xadgudubka xuquuqda aadanaha), waa muhiim inaad sheegto waxa kuwaan ay yihiin iyo **sida shakhsi ahaan ay kuu khuseeyaan.**

# KA DIB WARAYSIGAAGA MAGANGALYADA

- Waxaad xaq u leedahay inaad codsato **nuqul ka mid ah qoraalka waraysigaaga.** Waxa laga yaabaa in si toos ah laguu siiyo markii uu waraysiga dhamaado hadii uu diyaarsan yahay, ama kaliya goor dambe adiga oo ka soo codsanaayo xafiiska magangalyada.
- Waxaad **soo gudbin kartaa wax kasta oo dukumeentiyo dheeraad ah** si ay u taageeraan kiiskaaga **dhowr maalmood gudahooda**. U dir cinwaanka iimaylka lagaa soo siiyey xafiisk magan galyada intii lagu guda jiray waraysigaaga.

- Waxaa **laga yaabaa in laguugu yeero waraysi kale** haddii xafiiska magangalyada uu u baahan yahay macluumaad dheeraad ah.

- Waxaad heli doontaa go'aan ku saabsan kiiskaaga, toddobaadyo ama bilooyin gudahooda. Haddii go'aankani diidmo noqdo, akhri xaashida macluumaadka **Ogow xuquuqdaada: Ka dib markii aad hesho go'aan diidmo ah**

LEGAL
CENTRE
LESVOS

**WhatsApp:** +30 694 961 8883
**Landline:** +30 225 1040 665
**Iimaylka:** info@legalcentrelesvos.org
**Facebook:** www.facebook.com/LesvosLegal
**Cinwaanka xafiiska:** Komninaki 20, Mytilene 81100
**Saacadaha shaqada :** Isniinta ilaa Jimcaha - 10 subaxnimo ilaa 2 galabnimo